

2023-08-30

## **Dib u gurashada Guddiga Labada Maalmood ee Guddida Waxbarashada ayaa Muujinaya Aragti La wadaago oo Guusha ah**

Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb ayaa ku kulmay laba maalmood oo dib u gurasho ah 23 iyo 24 Agoosto, halkaas oo ay kula galeen wadahadalo macno leh maamulayaasha dugsiga degmada oo mowduucyo kala duwan ah. Kuwaan waxaa ka mid ahaa isticmaalka xarunta, dhismaha iyo cusbooneysiinta, aqbaaraha ku saabsan hormarka aqoonsiga Cognia, natiijooyinka hantidhowrka, dib u eegista 30-ka maalmood ugu horeeya ee kormeeraha guud, iyo qiimeynta Guddiga. Dib u gurashada waxay cadeysay inay aheyd waqti wax soo saar ah oo milicsiga iyo qorsheynta, iyadoo si gaar ah diirada loo saarayo mustaqbalka Degmada.

“Waa muhiim in la joogteeyo wada xiriir furan oo lala yeesho maamulayaasha Degmada inagoo la soconeyno inagoo weydiineyno su'aalo oo aan bixineyno jawaab celin muhiim ah. Dib u gurashada waxay aheyd fursad heer sare oo lagu sameeyo midaas kaliya,” Mudane Dijon DaCosta ayaa yiri. “Guddoomiye ahaan, waxaa iga go'an inaan arko in xubnaha Guddiga ay la socdaan hormarada ugu dambeeyay ee Degmadeena. Noocyadaan iskaashiyada ah waxay hubisaa inaan ka shaqeyneyno aragti la wadaago oo mustaqbalka aqoonyahanadeena, shaqaalaha, iyo qoysaska.”

Dareenkaan waxaa ku dhawaaqay guddoomiye ku xigeenka guddiga Marwo Deirdre Pierce, oo iftiimisay qiimaha howlgelintan oo kale.

“Dib u gurashooyinkaan waxay bixisaa fursado muhiim ah oo lagu barto, lagu wadaago, oo lagu fahmo 'sida' iyo 'sababta' ka dambeeya go'aannada, taasoo si cajiib ah waxtar u leh,” ayay tiri. “Waxaan aad ugu riyaaqay waqtigeena wada jirka ahaa oo waxaan dareemayin dhammaan soo jeediyaasheena xirfadlaha iyo fududeeyayaasha aqoonta sare u leh ay sameeyeen shaqo fiican oo bixineyso warbixin diirada saarta kobcinta aqoonteena sida hay'ad maamuleysa,”

Mid ka mid ah qodobada dib u gurashada dhexaadka wuxuu ahaa wadahadalka ku hareersan Kormeeraha guud ee cusub Dhaqtar Devon Horton, 30-kii maalmood ee ugu horeeyay ee hogaanka. Xubnaha guddiga ayaa si aan mugdi ku jirin u ammaanay qaabka hoggaaminta ee Dhaqtar Horton ee “*Carqaladeynta Heerka sare*”, iyadoo ammaanay guulhiisa xaqiijinta daahfur guul ah ee sannad dugsiyeedka 2023-2024.

“Aad ayaan ugu farxay dib u eegista wanaagsan ee Dhaqtar Horton ee isbuuca furitaanka dugsiga iyo sida dib u habeyntiisa diyaarinta uu diirada si culus ugu saaro guusha kama dambeysta ah ee aqoonyahanada ardaydeena iyo mustaqbalka aadka u ifaya ee aan ka filan karno DCSD! Waxay guul-guul u tahay ardayda, shaqaalaha, iyo bulshooyinka!” Marwo Pierce waxay tiri.

Iyadoo la aqoonsanayo inay jiraan shaqo badan oo hor taal, Dib u gurashada Guddida ee Labada Maalmood waxay abuurtay aasaas adag oo lagu dhisayo. Waxay dejisay marxalada hab la ogeysiiyo iyo wada shaqeyn kooxeed u dhaxeeyo Maamulayaasha cusub ee Degmada iyo hoggaanka Guddiga si loo hormariyo natiijooyinka tacliimeed, bulsho, dareen, iyo jireed ee ku dhawaad 92,000 arday ee Degmada iyo 14,500 shaqaale.

Iskaashi xoogan ee u dhaxeeyo Guddiga Waxbarashada iyo maamulada Degmada wa muhiim oo waxay muuqatay inta lagu jiray dib u gurashada. Maamulkooda wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa hormarinta siyaasadaha, dejinta ujeedooyin cad iyo heerar, kobcinta isla xisaabtanka, iyo mudnaan siinta sinnaanta hindisayaasha Degmada si sare loogu qaado waxbarasho ahaan heer sare iyo maamulka maaliyadeed ee masuulka ka ah.

XXX